



# GURMADKA DIGNIINTA MOOBILKA

Booqo [getready.govt.nz](http://getready.govt.nz) si aad u hubiso haddii moobilkaagu ku shaqayn karo.

Haddii noloshaada, caafimaadka ama hantida ay ku jirto khatar dhab ah, Gurmada Digniinta Moobilka ayaa loo soo diri karaa moobilkaaga.

Gurmada Digniinta Moobilka waa fariin uu u soo diro moobilkaaga wakaalada loo xilsaaray. Waxay samayn doontaa cod qaylo dheer si ay kuugu digto.

## Maxaan samaynayaa haddii aan helo Gurmada Digniinta Moobilka?

Jooji waxa aad qabanayso oo raac tilmaamaha.

Fariinta Digniinta Gurmada Moobilka waxaa keliya loo diraa:

- Haddii ay jirto khatar halis ah nolosha, caafimaadka ama hantida, ama
- mar ama labba jeer sanadkii wixii ah ujeedooyinka baadhitaanka.

Haddii aad digniin hesho, si dhab ah u qaado oo samee waxay sheegayso.

Dhammaan telefoonadu ma awoodaan helida Gurmada Digniinta Moobilka, haddii aad digniin hesho, kuwa kale ogaysiis.

## Miyaan u baahanay inaan iska diiwaaniyo Gurmada Digniinta Moobilka?

Ma jirto baahi loo qabo iska diiwaangelinta ama soo dejinta abka. Digniinaha waxaa yoolka lagu saaraa aagaga waxyeeladu saamaysay, markaas waxaa keliya oo aad heli doontaa haddii gurmada uu yahay aagaaga.

Haddii telefoonkaagu uu daaran yahay, awoodo helida iyaga iyo gudaha aaga yoolka la saarayo, waa inaad heshaa digniinaha. Waxaad ogaan kartaa haddii telefoonkaagu uu awoodo helida digniinaha ka yimid [getready.govt.nz](http://getready.govt.nz).

## Kumaa diri kara Gurmada Digniinta Moobilka?

Fariimaha Gurmada Digniinta Moobilka waxaa keliya oo diri kara:

- Wakaalada Maamulka Gurmada Qaranka
- Gurmada Difaaca madaniga ah Kooxaha Maamulka
- Booliska NZ
- Dabka iyo Gurmada New Zealand
- Wasaarada Caafimaadka, iyo.
- Wasaarada Warshadaha Koowaad

## Gurmada Digniinta Moobilka ma beddesho kanaalada kale.

Gurmada Digniinta Moobilka keliya waa kanaal dheeraad ah si badbaado laguugu ilaaliyo oo lagugu wargeliyo gurmada. Digniintu ma beddesho nidaamyada kale ee digniinta, ama baahida in tallaaba laga qaado ka dib digniinta dabiiciga ah.

## QAABABKA WARKA LAGU HELAYO



Tiifiiga



Raadyaha



Saxaafada bulshadda



Internatka




Gurmada Digniinta Moobilka

Weli waa inaad diyaar u ahaataa gurmada, oo waa inaad sugin inaad hesho digniinta ka hor inta aanad tallaabo qaadin. Haddii aad dareentu in noloshaadu halis ku jirto, ha sugin digniin rasmi ah. Qaad tallaabo degdeg ah.

Wakhti ku qaado si aad u samayso qorshahaaga gurmada ah kaas ay ku jiraan waxa la samaynayo, cida ku caawin karta iyo cida u baahan karta caawimadaada. Waxaad qorshaha ka samayn kartaa onlayn bogga [getready.govt.nz](http://getready.govt.nz).

## Sidee Gurmada Digniinta Moobilka u shaqeeyaa?



1. Wakaalada loo xilsaaray ayaa go'aan ka gaadha aagaga khatartu saamaysay oo waxay abuurtaa digniin.
2. Digniintu waa baahinta warka ka timid taawarada moobilada la xidhiidha.
3. Telefoonada moobilada awooda leh ee ku yaala aaga saamayntu ka dhacay ayaa hela digniinta.

Gurmada Digniinta Moobilka waxay isticmaalaan ishaarada loo qoondeeyay, markaas aad ayaa la isugu halayn karaa gurmada marka telefoonka moobilka iyo cidhiidhiga internatka uu buux dhaafiyo shabakada.

Macno malaha shabakada aad ku jirtaa. Telefoon kasta oo awood leh aaga gelida muddada baahinta waxay heli doonaan digniinta.

## Ma iska dhaafaa doorashada helida Gurmada Digniinta Moobilka?

Maadaama Gurmada Digniinta Moobilka ay ku saabsan tahay inay adiga ku badbaadiso, awood uma yeelan doontid inaad iska dhaafto doorashada helida Gurmada Digniinta Moobilka. Digniinaha yoolka ma saaraan telefoono gaar ah, beddelkeed waa warbaahinta aaga yoolka la saarayo ee khatarta ku sugan. Gurmada Digniinta Moobilka ma isticmaalo lambarkaaga telefoonka ama ma urursho macluumaadka adiga kugu saabsan.

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan Gurmada Digniinta Moobilka, booqo [getready.govt.nz](http://getready.govt.nz)